

# Tallaalka KOFID-19 iyo Uurka

## Tallaalka KOFID-19 waa mid badqab u leh qofka uurka leh.

- Xarunta xakamaynta iyo ka hortagga cudurada faafa ee CDC qeybteeda gobolka Minnesota ee qaabilسان caafimaadka bulshada waxay kula talinaysaa dhamaan dadka uurka leh, dhawaan uur qaaday, naaska nuujinaysa, iyo kuwa ka fakaraya inay uur qaadaan inay iska tallaalaan cudurka KOFID-19. Dadka uurka leh waxay khatar ugu suganyihii inuu ku dhaco xanuun uu sababay KOFID-19 marka la bar-bardhigo dadka aan uurka laheyn.
- Haddii aad uur leedahay, is tallaal si aad isaga ilaalisid inuu kugu dhaco xanuun aad u daran uu sababay KOFID-19.
- Daraasadda waxay tilmaamaysaa in tallaalka KOFID-19 uu yahay mid badqab ah xilliga uu qofka uur leeyahay iyo sidoo kale xilliga naas nuujinta.
- Tallaalka KOFID-19 ma ilaaliyo kaliya qofka uurka leh ee sidoo kale wuxuu ilaalliyaa dhallaanka cusub ee dhasha.
  - Daraasadda waxay tilmaamaysaa dadka qaatay tallaalka KOFID-19 xilliga ay uurka leeyihii wuxuu dhallaanka ay dhalaan ka yareeyaa khatarta ah inay isbitaal u galaan cudurka KOFID-19 lixda bilood ee ugu horaysa noolasha ilmaha dhashay.
- Dadka uurka leh oo la xanuunsan KOFID-19 ilmaha calooshooda ku jira waxaa laga yaabaa inay khatar galaan.
  - Waxaa jirta khatar sii kordhaysa dhalmada ka hor, waxaana laga yaabaa in ay jirto khatar sii kordhaysa oo ah in dadka uurka leh ilmaha ay sidaan caloosha ku dhintaan kuwaa oo laga helay cudurka KOFID-19.
- La hadal daryeel bixiyahaaga caafimaad haddii aad su'aal qabtid.
- KOFID-19 malagaa tallaalay mar hore? Hubi in aad qaadatay ugu yaraan hal kuuro oo ah tallaalka la cusboonaysiyyey ee (laba- geesoodka) ah si ay u noqoto mid kuu dhamaystiran kana mid ah tallaaladaada KOFID-19.

## Tallaalka KOFID-19 waa mid badqab u leh dadka doonaya inay mar un ilmo dhalaan.

- Haddii aad doonaysid inaad hadda uur yeelatid ama mustaqbalka, waxaa lagula talinayaan inaad qaadatid tallaalka KOFID-19.
- Majiraan wax cadeen ah oo sheegaya in tallaalka KOFID-19 uu keeno dhibaatooyin xagga dhalmada ah.

Minnesota Department of Health  
625 Robert Street North, PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
651-201-5000  
[health.mn.gov](http://health.mn.gov)

09/20/2023

La xariir [health.communications@state.mn.us](mailto:health.communications@state.mn.us) si aad u codsato xogta oo qaab kale ah (Somali).